

FAAFIN RASMI AH



JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadk a16aad Muqdisho 28ka Agoosto 1988 L. 2 R 8

Laanta Faafinta Rasmiya ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya
 FAAFIN BIL SOO BAXA هويبة شهرية

QIILAHU: waa 5 shilin lambar wajiba — RUKUNKA: Sa-
 nadii waa Sh. 100 Soomaaliya gucaheeda — dibaddoodana
 waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaaamas 1
 Jannaayo. Qaimaha qoritaanku F.R. hajkii sadar iyo waxii
 ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waa la wey-
 diiqa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiya ah — Lacagta
 waxaa lagu bixiayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda
 Lacagta.

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Jannaayo 1988

K O O B N I I N

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

QAYBTA

LABAAD

X E E R

- | | | |
|--|------|-----|
| XEER.SHARCI L. 4 ee 1 Agoosto 1988, Wax
ka beddelidda Sharci lam. 5 ee 5.11.66,
Canshuurta Toosan. | Bog; | 620 |
| XEER.SHARCI L. 5 1 Agoosto 1988, Canshuur-
ta dhoofidda (tax departure). | » | 622 |
| XEER.SHARCI L. 6 ee 1 Agoosto 1988, Banki-
yada gaarka ah ee Dalka JDS. | » | 624 |
| XEER WASAARADDA K. IYO GAADIIDKA
BADDA L. 17 ee 28.6.88, Dhismo iyo da-
yactir Jid. | » | 626 |

Xeer sharci lambar 6, taariikh 1da Agoosto 1988: Bankiya-
da gaarka ah ee Dalka JDS.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 26 ee 7da Maajo
1970 (toleynta bankiyada gaar ah);

MARKUU GANWAAQDADAY: Baahida loo qabo in Dal-
ka laga turo bankiyo gaar ah (private) oo ka qayb qaata
maalgelinta masnaaricda horumarinta ee Dalka ka socota;

MARKUU TIXGELIYEY: Soojeedinta wasiirka Wasaa-
radaha Maamulka iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer-sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Dalka JDS waxaa laga turji karaa bankiyo wadaag ah
oo ka qayb qaata maalgelinta masnaaricda wax soo saarka
iyo horumarinta dhaqaale ee Dalka.

2. Bankiyadu waxay noqonayaan kuwo gaar ah (private)
waxaana dhismahooda, maamulkooda iyo dhaqdhaqaa-
qooda lagu saleynayaa Xeerka Madaniga.

Qod. 2aad

Maalgelinta dhismaha bankiyada laga hirgelinaayo
Dalka waxaa la waafajinayaa habka iyo nidaamka Sharciga
Maalgelinta Shisheeye ee JDS.

Qod. 3aad

Waxaa mudnaan gaar ah yeelanaya bankiyada ku ta-
lagalkoodu uu yahay maalgelinta mashaariicda la xiriirta
beeraha, xoolaha, kalluumaysiga, macdanta, warshadaha,
dalxiiska, gaadiidka badda, guryo dhiska iyo kheyraadka
kale ee Dalka.

Qod. 4aad

Go'aanka furidda bankiyada ku tilmaaman Qod. 1aad
waxaa leh Golaha Wasiirrada, isagoo dhegeystay soojeedin.

ta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo ra'yiga Guddoomi-
yaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya,

Qod. 5aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu soo sa-
xiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faa-
finta Rasmiga ah, iyadoo loo gudbin doono Golhaa Shacbiga
si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 3da Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Bare)